

SOMALI - The importance of immunisation before and during pregnancy

Muhimadda tallaalka uurka ka hor iyo waqtiga uurka

Tallaalka

- Wuxuu ka ilaalin karaa adiga, canuggaaga aan dhalan iyo kan dhashay cudurada faafa qaarkood. Cuduradan waxay u keeni karaan waxyeelo aad u daran adiga iyo canuggaaga.

Uurka Ka hor

Jadeecada, qaamo-qashiirka iyo rubeelaha

- Caabuqa rubeellaha oo loo yaqaan jadeecada Jarmalka, intaad uurka leedahay wuxuu kuu keeni karaa cilad oo u daran oo la dhasho.
- Waxaa muhiim ah inaad hubiso difaaca rubellahaaga ka hor uurka kasta.
- Waxaa waajiba inaad sugto afar toddobaad ka dib markaad qaadato tallaalka ka hor intaadan isku dayin inaad uur yeelato.
- Ha qaadan talaalka haddii aad uur leedahay.

Varicella (busbuska)

- Infakshanka busbuska marka ilmuu uurku jiro badanaa uma keeno xanuun daran adiga iyo cunuggaaga aan dhalan.
- Haddii aadan xasuusan karin haddii busbus kugu dhacay, wydii dhakhtarka (GP) inuu dhiig kaa qaado si loo hubiyo.
- Sug afar toddobaad ka dib markaad hesho tallaalka ka hor intaadan isku dayin inaad uur yeelato.

Intaad uurka leedahay

Hargabka

- Haweenka uurka leh waxay halis dheeraad ah ugu jiraan inay qaadaan caabuqa hargaba oo qalafsan.
- Tallaalka hargabka waxaa lagula talinaya haweenka uurka leh.

Pertussis (xiqdheer)

- Isla Tallaalida xiqdheerta intaad uurka leedahay waxay ka difaacdaa ilmahaaga bisha ugu horraysa dhalashada ka dib.
- Tallaalka Kixdheerta (Boostrix) ayaa lagu talinaya 20 asbuuc ka dib uurka, xataa haddaad mid samaysay kahor uurka ama inta lagu jiro uurka.
- Isla tallaalka Qiixdheertu (Boostrix) wuxuu kaloo difaaca cudurrada gawracatada iyo teetanada.

Urka Ka dib

- Talaalka Qiix dheerta (Boostrix) wuxuu difaacaa Qiixdheerta welina wuxuu qiima u leeyahay uurka haddii aadan mid qaadan 10kii sano oo ugu dambeeysay.

Ka waran naas-nuujinta?

- Tallaaladaani waa u amaan markaad naas nuujinayso.

Ka waranaabayaasha, awooweyaasha, carruurta iyo dadka kale ee daryeela ilmahayga?

- Talaalka Qiixdheerta (Boostrix) 10kii sanaba hal mar waxaa lagu talinaya in dhamaan dadka daryeellaya ilmaha qaataan.
- Waa u ammaan inay qaataan tallaaladan intaad uurka leedahay.
- Carruurtaada kale waxaa waajiba inay I acusboonaysiyo talaalada si loo caawimo difaacida ilmahaaga dhashay.
- Fadlan arag dhakhtarkaaga guud si aad ugala hadashid tallaalka.

Ka waran carruurta yaryar?

- Dhamaan carruurta yaryar waa in la tallaalaan sida uu ku taliyey Barnaamijka Tallaalka Qaranka (National Immunisation Program).

Xiriirada waxtarka leh

<https://www.health.gov.au/health-topics/immunisation/immunisation-through-life/immunisation-for-pregnancy>

Macluumaad dheeraad ah:

La xiriir GP-gaaga, obstetrician-ka ama umulisada si aad wax badan u ogato.

Acknowledgements

Produced by: Maternity Services MHVL

Date produced: Jan 2018

Date of last review: December 2020

Date for review: December 2022